

Ku Soo Dhawoow Nidaamka Gudbinta Elekterooniga ah ee Karaaniga Maxkamadda Sare ee Degmada King ee Loogu Talagalay Amarada Ilaalinta Madaniga ah.

Amarada ilaalinta madaniga ah ayaa loo heli karaa xaaladaha ku lug leh **rabshadaha qoyska ama guriga, weerarka galmada, dhibaateynta, hagaradaamada, khatarta xad dhaafka ah, ama xaaladaha nuglaanshaha ee dadka waaweyn.**

[RCW 7.105 waxa uu ku siinayaa macluumaad kaa caawinaya inaad fahanto faraqa u dhaxeeya noocyada amarada ilaalinta wuxuuna ku siinaysaa macluumaad kale oo muhiim ah.](#)

Adiga oo isticmaalaya Barta KC Script, waxaad sidoo kale ku soo gudbin kartaa dukumentiyada dhaqangelinta Amarka Ilaalinta Rabshadaha Guriga ee Kanada.

Caawimaad Laga Helayo U-doode: Inkasta oo aysan khasab kugu ahayn, waxaad la hadli kartaa u doode ama kooxaha kale ee la xiriira amarka ilaalinta. Kuwaasi waa inay ku siiyaan adeegyo qarsoodi ah iyo adeegyo lacag la'aan ah. Kooxahani waxay kaa caawin karaan inaad qiimeyso heerka khatartaada, qorshaha badbaadada, waxayna kaa caawin karaan buuxinta codsiga amarka ilaalinta iyo dukumentiyada kale ee loo baahan yahay. Haddii aad rabto inaad ku xiriirto kheyraadkaas, fadlan guji [HALKAAN](#).

Tallaabada 1-aad: Buuxi Foomamka Loo Baahan Yahay

Buuxi foomamka loo baahan yahay adigoo isticmaalaya [Caawimaadda Sharciga Washington](#). Caawimadda Sharciga Washington waa websayd onlayn ah oo abuura foomam, wuxuuna si fudud kaaga caawin doonaa inaad buuxiso foomamka aad u baahan tahay si aad u bilowdo kiiskaaga. Waxaan aad kuugula talineynaa inaad isticmaasho qalabkaas si aad u buuxiso foomamka si aad uga fogaato daahitaan ama inaad soo gudbiso foomamka aan dhamaystirnayn. **Kadib marka aad buuxiso foomamkaaga, u gudub talaabada 2-aad ee hoose.**

**[Buux Foomamkaga: Caawimaadda
Sharciga Washington](#)**

Haddii aad doorbidayso inaad daabacdo foomamka oo maran oo PDF ama Word ah, fadlan websaydkeena ka booqo [HALKAAN](#).

Tallaabada 2-aad: Dukumentiyadaada U Gudbi Karraaniga

Haddii aad diyaar u tahay inaad soo gudbiso dukumentiyadaada, guji "Hore Ugu Soco Gudbinta Amarka Ilaalinta" ee hoos ku qoran.

Karraaniga ayaa dib u eegis ku samayn doona soo gudbintaada maalinta shaqo ee xigta haddii aad soo gudbiso dukumentiyada amarka ilaalinta wakhti ka baxsan [saacadaha shaqada ee caadiga ah](#). Kadib marka aanu dib u eegis ku samayno soo gudbintaada, waxaanu kugu soo ogaysiin doonaa iimayl iyo akoonka barta. Dhammaan fariimaha khuseeya soo gudbintaada waxa lagu soo diri doonaa ciwaanka iimaylka ee la xiriira akoonkaaga Bogga.

Hore Ugu Sii Soco Soo Gudbinta Amarka ilaalinta

Xusuusin ku Socota Hay'adaha Dhaqangelinta Sharciga: Fadlan sii wad isticmaalka nidaamkayaga soo gudbinta elektrerooniga ah si aad u soo gudbiso amarada Ilaalinta Khatarta Xad dhaafka ah (ERPO) xilliyada ka baxsan saacadaha shaqada. Linkiga soo Gudbinta Elekteronigga ah: [KC - E Filing \(kingcounty.gov\)](#)

Wax badan ka baro hannaanka nidaamka ilaalinta iyo agabyada kale:

<p><u>Sida loo Icticmaalo</u> <u>Nidaamka Soo Gudbinta</u> <u>Elekteroonigga ah</u></p>	<p><u>Booqo Websaydkeena Amarka</u> <u>Ilaalinta</u></p>
----------------------------------------------------------------------------------------------------------------------	----------------------------------------------------------------------------

<p><u>Khadka Rabshadaha</u> <u>Qaranka Qoyska ee</u> <u>Qaranka</u></p>	<p><u>Su'aalaha Inta Badan La</u> <u>Isweydiyo (FAQs)</u></p>
------------------------------------------------------------------------------------------------------	---------------------------------------------------------------------------------

Fadlan guji [HALKAAN](#) si laguugu hago macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan amarada ilaalinta oo ku qoran Soomaaliga.

Waxaan jeclaan lahaa inaan maqlo fikirkaaga! Haddii aad hayso fikrado ama soojeedino la xariira turjumaadaan, fadlan iimayl noogu soo dir: djatranslations@kingcounty.gov.